



**Technical Assistance ALLIANCE
for Parent Centers**
8161 Normandale Blvd.
Minneapolis, MN 55437-1044
952.838.9000
952.838.0190 TTY
952.838.0199 fax
888.248.0822 National Toll-free
alliance@taalliance.org

www.taalliance.org

Talooyin Loogu Baaqayo Waalidka Xagga Qorsheynta Barnaamijka Xilli kala Guurka

Parent Tips for Transition Planning—Somali Version

Marka ardeydu ka qalin jebiso dugsiga sare oo ay ku food leeyihiin jaamacadda iyo mustaqbalka ka dambeeya, ayaa waxaa loo yaqaan xilli kala guurka. Haddaad dooneyso in ilmahaagu maro xilli kala guur najaaxo iyo micno leh, waa in aad horey u qorsheysaa. Qorshahani waxaa sal u ah hamiyadda, kartida iyo riyada qofka dhalinyarada ah leeyahay. Waxey dhiseysaa sida xooggan ee qofka dhalinyarada ah uga kheyb qaato tacliinta, guriga iyo nolosha jaaliyadda.

Qorsheynta waqtigan xilli kala guurka ah waxey dhalinyarada u diyaarisaa mustaqbalka. Waxeyu masamaaxaysaa in ay yeeshaan xirfad ka caawisa tacliinta ka dambeya dugsiga sare. Waxey yeeshaan kartida ay kula mucaamiltamaan jaaliyadda, nolosha iyo shaqadaba. waxey ku bartaan madax bannaani. Marka ay ka kheyb qaataan barnaamijka qorsheynta dugsigu u fidiyo, waxey barataa sida ay go'aan la mid ah kan dadka waaweyn ku gaaraan.

Qorshahan ma in uu ka mid ahaadaa Qorshaha Waxbarashada Gaar ahaaneed?

Marka ardeygu jirsado 16 sano, Barnaamijka xilli kala guurka waa in uu ka mid ahaadaa qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed. Arday badan ayaa 14 jir ku billaaba barnaamijkan si ay waqt ugu helaan xirfadaha ka caawiya mustaqbalka. Waalidku haddeey aaminsan yihii in ilmahoo duu u baahan yahiin barnaamijka, waa in ay si kalsoonni leh dugsiga u weydiin karaan in ilmaha loo billabo qorsheynta inta ay jirsado 16. Qorshaha xilli kala guurka, goolka ilmaha laga doonayo in ay gaaraan iyo howlaha loo qabanayo waa u qaas arday walba.

Howlaha xilli guurka waxaa ka mid ah: hageyn khibrad xagga jaaliyada ah iyo xirfad dhismo khibrad howleed ah. Waxaa kaloo ka mid ah sida ardeydu u yeelan laheyd hamiyad nololeed oo ay doonayaan in ay gaaraan mark ay dugsiga dhameeyaan iyo tababar nololeed ama tababar xirfaddeed oo loo baahan yahay in lagu qabto shaqo. Howlahan oo idil waa in la fuliyaa iyadoo la khadarinayo dhaqanka iyo lukhadda ardeyda.

Howlaha xilli kala guurka waxey ku saleysan yihii, kartida iyo baahida ardeygu leeyahay. Waxaa la qadiranaya waxyaabaha qofka dhalinyarada ah jecelyahay iyo waxyaabaha maslaxo ugu jirta. Howlaha wax qabadka ee ka mid ah xilli kala guurka waa in loola dan leeyahay in natiijyo lagu gaaraa. Taasi micnaheedu waa in howlahan ku taqasusan yihii in lagu dhiso kartida qaaska ah ee qofku leeyahay.

Ardeydu ma in ay ka kheyb qaadataa qorsheynta barnaamijka xilli kala guurka?

Marka loo garto in ardeygu u baahan yahay howlaha xilli kala guurka ee laga shirayo waxbarashadooda gaar ahaaneed, dugsiga waxaa ku qasban in uu casumaad u fidiyya ardeyda in ay ka kheyb qaataan shirkhan. Marka ardeygu jirsado 16 iyo ka weyn, howlahan xilli kala guurka waa kheyb sharcyan in ay qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed ka mid noqoto ah. Waa in ay ahaadaan kuwo si joogto ah looga wada hadla marka laga shirayo qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed. Howlahan waa in kooxdoo ka xajootaa oo la qorsheeyaa marka ugu dhaqsida badan ee loo garto in ardeygu u baahan yahay. (Gobollada qaarkood waa sharcin qorsheynta howlahan la billaabaa marka ardeygu jirsado 14.)

Maxaa dhacaya haduu ilmaheygu ka kheyb qaadan shirkha waxbarashada gaar ahaaneed?

Hadii uusan qofka dhalinyarada ah ka kheyb qaadan shirkha looga wada hadlayo waxbarashadooda gaar ahaaneed, ama awoodin in uu ka kheyb qaato, shaqaalaha dugsiga waaxaa ku qasban in ay qadariyaan oo ay qorshaha ku daraan waxyaabaha qofka dhalinyarada ah hamiyadiisu tahay ee maslaxo ugu jirta.

Qorshaha xilli kala guurka ugu wanaagsan waa kan qofka dhalinyarada ah ku gaari kara damaca iyo riyaduu nolosha ka lahaa. Waa in qofka dhalinyarada ah lagu daraa dhan walba ee barnaamijka qorsheynta ka mid ah. Waa in

lagu dhiiro geliyaa in ay ka kheyb qaataan goolka loo dejinayo iyo shirka. Ka kheyb qaadashada uu qofka dhalinyarada ka kheyb qaadanayo qorshaha waxey kooxda ka cawineysaa, in ay xoogga saaraan baahida iyo hamiyadda qofku leeyahay. Qofka dhalinyarada ahna waxuu ku baranayaa xirfada iyo habka wax loo go'aamiyo iyo habka uu xaqquqdiisa ugu doodo. Marka qofka dhalinyarada ah barto kheybta uu ka leeyahay qorsheyn ta xilli kala guurka, waxuu noqonayaa qof muhiim ah oo kooxda ka mid ah.

Sidee u hubsadaa in qorshaha waxbarasho yahay mid ilmaheyga ka qancinaya baahida uu u leeyahay xilli kala guurka?

Howlaha xilli kala guurka waxay ku billawdaan iyadoo la qiimeeya ama la imtixaama ardeyga marka uu gaaro da'da ku haboon. Qiimeeyntan waxaa ka mid ah wargelin lala yeesha ardeyga iyo waalidka, iyadoo la xogsado damaca iyo xirfadda caruurtooda leedahay iyo habab kale.

Waa in waalidka iyo shaqaalaha dugsigaba ka kheyb qaataan qiimeeynta si qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed loogu qanciyo baahida caruurtooda leedahay xilli kala guurka. Dugsigu waxuu arintaan ku gaarayaa qiimeyn iyo indha indheyn lagu sameeya caruurta. Waalidkuna waxuu caruurta kala hadlayaa hamiyadda iyo riyada ay leeyihiin oo waxuu la soconayaa xaaladda caruurta ku sugantayah markaa.

Marka waalidka iyo ardeydaba jawaab u helaan su'aalahaa hoos ku qoran, waxaa u caddaaneysa habka iyo sida ay isugu diyaariyaan ugana kheyb qaataan kulanka looga hadlayo qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed oo ay mowqifkiisu tahay in lagu qorsheeyo xilliga kala guurka:

- *Maxuu qofka dhalinyarada ah doonayaa in uu nolol ka dhigto?* Maxey tahay riyada, damaca iyo goolka ay nolosha ka leeyihiin? Jawaabaha qofka dhalinyarada ka bixiyo su'aashan waa in ay ahaadaan kuwo ku saleysan dhinac walba oo ka mid ah qorshaha xilli kala guurka. Haduu qofka dhalinyarada ah yahay qof aan hadalka awoodin ama xiriiri kareyn, waa in waalidku isticmaalo aqoonta ay caruurtooda u leeyihiin si ay hubiyaan in qorshaha xilli kala guurka fulinayo hamiyada caruurta.
- *Waa maxay kartida, xirfadda iyo baahida qofka dhalinyarada leeyahay?* Waalidku waa in uu la socdaa caawinaad intee ah ayey caruurtoodu u baahan yihiin ama howlaha aan muhiimadda aheyn in caruurta qabato.
- *Waa maxay natijiyyada qofka dhalinyarada ah iyo waalidkaba doonayaan in ay gaaraan?* Waalidka iyo ilmahaba waa in ay talo la yimaadaan shirka looga hadlayo xilli kala guurka. Taloooyinkan waxaa ka mid noqon kara; nuuca howlaha ilmaha loo qabanayo, wax qabadka ama qorsho ay aaminsanyihiin in lagu fulin karo goolasha ka mid ah kuwa kheybta xilli kala guurka oo lagu qoro qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed.

• *Qofka dhalinyarada ah ma in uu ka kheyb qaataan kulanka xilli kala guurka ee lagu qorsheynayo waxbarashada gaar ahaaneed?* Waalidku waa ku dhiira gelin karaan caruurtooda in ay ka kheyb qaataan. Caruurta waa laga casuumayaa shirka. Caruurta iyo waalidka si gooni ah ayey isu diyaarin karaan. Hase ahaataa, haddey caruurta go'aansato in aysan ka kheyb qaadan, waalidka ayaa meteli kara baahida iyo mowqifka ay leeyihiin.

• *Siduu qofka dhalinyarada ah u bartaa xirfadaha xuquuqdiisa ugu doodo?* Waalidka iyo shaqaalaha dugsiga waa in ay ku dhiira geliyaan dhalinyarada habka ay ugu doodi lahayeen xuquuqdooda. Marka shirka loo fadhiyo, shaqaalaha waa in ay su'aalaha si toos ah u weydiyaan qofka dhalinyarada. Waa muhiim in lagu dhiira geliyaa dadka dhalinyarada ah in ay ra'yigooda ka dhiibaan. Waa muhiim in qofka dhalinyarada ah fahmayo halka dhibaatada ka haysata oo ay weydiisan karaan waxii waafajin ah oo ay u baahan yihiin.

• *Waa maxay barnaamijyada, howlaha, waafajinta ama hab doorinta qofka dhalinyarada u baahan yahay?* Waalidka iyo caruurtooda dhalinyarada ah waa in ay fikiraan oo ay si cad ugu muuqato waxyabaha ay jecelyihiin ama u baahan yihiin. Kooxda waxbarashada gaar ahaaneed waxey ka falanqooneysaa arimahaan, laakiin waalidka iyo caruurta waa in ay horey uga soo wada tashadeen oo talo wanaagsan la yimaadaan qorsheynata.

• *Waafajin nuucee ah ayuu qofka ardeyga ah u baahan yahay marka uu ka gudbo tacliinta sare ama shaqada?* Waalidka iyo qofka dhalinyarada ah waa in ay horey uga sii fikiraan nuuca waafajinta ardeygu u baahan yahay marka uu ka gudbo dugsiga sare iyo habka ardeygu u heli lahaa.

• *Yaa ka masuul ah kheybaha kala duwan eebarnaamijka xilli kala guurka oo ka mid ah qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed?* Waa wanaagsan tahay in waalidku horey u ogaado cidda ka masuul ah gool walba ee ka mid ah xilli kala guurka. Howl walba waa in ay lahaataa waqtii go'an oo la doonayo in lagu dhameeyo. Waqtigaa go'an waa in lagu xusaa qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed.

• *Waxbarashada iyo barnaamijyada xilli kala guurka ma in ay ku taqasusaan baa gool ama daraaso macquul ah?* Qofka dhalinyarada ah ma u baahan yahay labadaba? Tani waxey ku xiran tahay hamiyadda qofka shaqsiga ah leeyahay.

• *Waa maxay fursad tababareedka ku saleysan jaaliyadda ee uu dugsigu bixiyo?* Waalidka iyo caruurta ay dhaleen ayaa go'an ka gaari kara in kheyb intee ah ayey ka qaadanayaan howlaha.

• *Haduu ardeygu qorsheynayo in uu jaamacad aado, miyuu qaadanayaa draasada la isaga baahan yahay in ardeygu qaato si jaamacadda u aqbasho?*

- Goormuu qofka dhalinyarada ah qalin jebinayaa? Shahaado nooceee ah ayaa ku haboon?
- Howlaha tababarada ah ee fasalka lagu bara miyeey ku haboon yihii ardeyga si uu u gaaro hamiyaduu shaqada ka lahaa? Waxaa baaris lagu ogaaday dadka dhalinyarada ah ee tababar la xiriira howsha ay doonayaan ku soo barta dugsiga sare in ay horumar wanaagsan gaaraan.
- Sidee waxbarashada iyo barnaamijyada xilli kala guurka la isula xirrin karaa oo hal barnaamij oo ka mid ah barnaamijka caadiga ah looga dhigi karaa?
- Yaa ka kheyb qaadanaya shirka waxbarashada gaar ahaaneed? Waalidka iyo dadka dhalinyarada ah waa in ay la socdaan howsha iyo kheybta dadka kala duwan ee kooxda ka mid ah ka xil saaran. Waxey kaloo in ay la socdaan tahay, cidda ka socota hay'adaha jaaliyadda (ee bixiya tababar xirfaadeedka lagu qabto shaqo) ee xaadirka ah. Hadii ay jirto hay'ad qas ah oo qofka dhalinyarada ah la shaqeeya, waalidku waxuu codsan karaa in hay'addaa shirka laga casuumo. Waqtigan waa waqtiga ugu wanaagsan in aad barato oo aad macriifo la noqoto hay'adaha dadka dhalinyarada ah la shaqeeya ama howlahaan bixiya. Mararka qaarkood waalidku waxuu doonayaan qof reerka ka mid ah, saaxiib, ama dadka xuquuqda ardada u dooda in ay shirka qorsheynta kala kheyb galaan si ay dhiiro gelin iyo talo uga helaan.

Waalidka iyo dadka dhalinyarada ah waa in ay heystaan jadwal maalmeedka simistarka ama sanad dugsiyeedka barkii. Waa muhiim in ay war u hayaan fasallada dugsigu bixinayo si ilmahu uga kheyb qaataan fasallada ay doonayaan iyo habka jadwalka loo tix raaco.

Baaqa ugu dambeeya: Waalidku waa in uu horey uga sii kikiraa sharciyada quseeya marka ilmuhi qaan gaaro ee ah da'da 18aad. Haduu qofka dhalinyarada ah awoodin in uu go'aan ka gaaro arimaha quseeya nolosha (daawada daryeelka, hab nololeedka, maamulka dhaqaalahi iwm.), waalidku waxuu u baahan yahay in uu ogaado habka ilaalinta ilmaha (guardianship).

Sharciga waxbarashada dadka naafada ah (IDEA) waxuu farayaa in ardeyda sanad ka hor inta ay qaan gaarin lala socodsiyaa xilka sharci ahaan iyaga ku wareegaya. Sharciyadan waxaa ka mid ah in ay masuul ka noqdaan qorsheynta, ogolaanshaha ama diididda howlaha ku xusan qorshahooda waxbarashada gaar ahaaneed. Waa muhiim in waalidku fahmo waxa ay arintan u micno tahay iyo doorka ay ku leeyihiin qorsheynta. Gobollada inta badan d'ada qaan gaarka waa 18 sanadood.

Marka waalidku ogaado fursadaha ilmahoodu leeyihiin xagga qorsheynta xilli kala guurka, waxey awood u yeelanayaan in ay xaqiijiyaan xaquuqda ilmahu leeyihiin inta ay baranayaan xirfadaha u hogaaamiya madax bannaani.